# G A B A Y A D I I

Xaaji Aadan 'Afqallooc'

Q a y b t a   2d.

# I F I Y A

Gabay uu tirshey Xaaji Aadan Afqalloc

3 Sept. I973

Waxa xa qoray: Cumar Au Nux

Gabaygu wuxuu u qaybsamaa:

I. Xaaladda reer miyiga
2. Kacaanka ka hor
3. Waqtigan Kacaanka
4. Qiimaha dadaalka iyo kalsoonida
5. Baryo iyo dacwo wax laguma helo
6. Duco.

Ayaamahan socdaalkii markaan reer miyiga aaday
Oo aan in badan soo maray oo helay akhbaartooda
Or bay tumanayeen nabadna way wada ahaayeene
Arsaaq badatay bay heleen iyo aaran iyo dooge
Ololkii colaaddiyo ka baxe dhamacdii oogneyde
Midba Jaalle buu odhanayaa kii aktiisa ahe
Kolkaasaan Ilaah ku xamdiyey oo aad u faaraxaye
Annagoo is wada tooganno kala ammaan weyney
Oo aan axsaab reer ah iyo doorashadii eednay
Oo calanku eedaad yahayoo ciiddu agab weydey
Oo aanu ilays jirin habeen agam ah mooyaane
Oo sebi agooniyo haween weer cad la arkaayo
Oo uu addoonsigu sidii adhiga noo qaybshey
Oo uu safiirba in watoo odayo laaluusho
Oo yoom kastaba alif u go'o aanadii tacasub
Oo abiyo reeriyo qabiil loo abtirinaayo
Oo qolo kasta awooweheed awliyo ahaaday
Oo uu sharcigu iib yahoo daallimku ugaadho
Oo kii sidaa maaha yidhi jeelka lagu awdo
Oo ay qarbigu nagu ismaan taallada amaahda
Oo nimaan adduun haysaniyo maato la allaaway
Oo aan aqal casiyo baarlamaan keliya eegeyno
Oo inaannu Bini Aadam nahay nala aqoon waayey
Ammaanduulayaashii horkacay tawradda Oktoobar

Ammaan iyo ducay leeyihiin lama allaawaane
Awood waxay u yeesheen dadkay aammin gelinyeene
Intii ay qabteen wax ugu weyn ururinteeniiye
Mabda' lagu islaaxiyo cilmay noo iftimiyeene
Ammime xoolahay naga dhaceen idil shisheeyuhuye
Ascaartii mawaashiga kaoday oo iibkii noo korodhye
Anaaniyada iyo laan dheer ma jiro axad ku doodaaye
Amaahdii qarbiga layska dhaaf ku agwareeggiiye
Afkii nalaku ceebayn jirey nagu ammaanaane
Arabakhida iyo hadhuudhkii baxoo deeqe aradkiiye
Iskuulladii shisheeyuhu hantiyey eegga laga saarye
Laga eri Ibleyskoorbiskiyo ubaAkii shaydaane
Ardadeennu Baaderi ma tadhi aabbe Joon yimide
Af Soomaaligaa lagu bartaa aqalladoodiiye
Ergaw dirannay uunkoo dhaniyo caalamkoo idile
Inta badan Afriikaanku waa na ixtiraamaane
Haddii ay eedi kala gaadho waa kala islaaxdaaye
Ilayskaa hayaanu u nahay ku iqtidoodaane
Ugaadhiyo dhirtii noo dhaqmoo kayntii la abuurye
Halkii ay macdani aasan tahay sahanku soo eegye
agoomihii rug baa loo dhisay iyo kaan ehel lahayne
Afgooyoo qudhay ku aflaxeen dhawr kunoo inane
Arbaciin lag guulwade ka badan nabadda eegaaye
Ummuuraha dalkoodaa la baray inay ilaashaane
Waa Aamigii saaddembiyo amalkii weynaaye
Asluubtii dadkeenniyo hiddada Eebbe nagu beeray
Ninkii uu ajnebi tababaraa garan awood waaye
Aqoonxumada meel lagu dhaqoo seeddu ku adkaato
Oo ay Afriikiba taclìin badi u soo aaddo
Oo geesigii lagu ismiyay aaddanii Xalane
Mas'uuliinta amarkii hayoo loo egmaday hawsha
Qof ba wuxuu awood leeyahaa lagu ogaadaaye
Akaademiya weyn bay u tahay maamulkoo idile
Guriga ummadda iyo laamiyada meel kastaba aaday
Iyo kaynta ku abuuran oo ciidda ka adkaysa
Albaabbada Taleex iyo Jubbada oogta waaberi ah
Alaabada dhulkeenna u hidda ah meesha lagu iibsho
Kolkaad aragto farax baa qalbigu kula abraaraaye

...../3-

Aqallada Kacaanku hirgeshay ugu horreeyaanq
Kolka uu ajnebi noo yimaa lagu ikraamaaye
Waa sharaf ummadi leedahay iyo dawlad alabkeede
In weyn baa dhaqaalihii kordhayoo waa ilaah mahade
Arbaciin mashruuc baa waqtigan la ebyi doonaaye
In weyn baa dhaqaalihii kordhayoo waa ilaah mahade
Arbaciin mashruu baa waqtigan la ebyi doonaaye
Awood baa fartii loo helay iyo dhaqankii aasnaaye
Ummaddeenna boqolkii tisciin waa akhriyayaane
Dalkoo idille maab lagu ebyey baa eegga soo baxaye
Waa maragga axad nagu murmiyo madaxdu eegaane
Midda intaaba ka cajaayib-laad daymo amankaagto
Arbaha dhagaxa tuuraaya oo gaalo ku eryaaya
Iyo inantii xaawoo gantaal ooftii laga taagay
Iyo qaar asaayihii dhinto cidi aqoon weydey
Ishaarooyin iyo taallooyin baa loo agaasimaye
Asaas gobannimay noo tahay iyo udub dhexaadkiiye
Ardal baan fahmine waa u sharaf idilka Soomaale
Abaalkii xornimo doonistaa loo aqoonsadaye
Dalkii aan lays ogaan jirin jidad baa gaadhay idilkiise
Arbacatacashar gobol buu noqdaan iniq is dheerayne
Mid kastaba Guddaa loo amroo eegga maamula e
Xamarna waa ambada lagu kulmiyo oogadii sare e
Haddii beri la kala oodmi jirey eebbe noo sahalye
Ahmiyadda uu leeyahay iyo agabarkuu gaadhay
Aamigu dhammaan qaaradduu wada ilaashaayaaye
Qiiniya Isboodhkaannu kala qayb galnaa caalamkoo idile
Shirkii lagu asaasoo Jarmali uunku wada joogey
Kooxdii aanaga noo tagtaa logu bogey aade
Waa tay awooddiyo libtaba u ictiraafeene
In badan baa wershedihii dhismoo la intifaacaaye
Ninna lama amroo waxaannu nahay uun xiyaadiyaho
Xaqaannu ayidnaa dulimna waa kaannu erinaaye
Waa midho bisha Oktoobar oo noo awaal baxaye
Weli waa abuur meelihii awrta loo wadaye
Markan aan istiilloo qalbiga daacad ka ahaanno
Orod iyo iskaashi baan ku tegi meel kastoo adage
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Isticmaar kulligii shiinuhuu eegga ka cabsoodo
Oo uu amreekaan Bakiin kaga ammaan doontay
Inta ay tawraddooda alkumeen amarka weyn gaadhay

..../4-

Afar iyo labaatankii gubaa eegga buuxsamaye
Aradkay qoteen tacabna waa ku ijtihaadeene
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Ummaaddii dedaashaaba waa aynigoo kale e
Adduunyada dagaalkii ka dhacay caalamkoo idille
Ayaan xumo Jabbaan iyo Jarmal baa aad u baabba'aye
Arwaaxa iyo maalkii ba waa kaga idlaadeene
Iqtisaadka maantana dadkay ugu horreeyaane
Kalsoonida Ilaahay baa la jira laysku aammino e
Ummaddii dedaashaa ba waa aynigoo kale e
Qarbigu Idilkii Kooriya marbay wada ataageene
Itoobiya iyo dhawr kalena daba ambuullaaye
Iyagaan adduun badan lahayn aaladna aan haysan
Isdaaface dagaalkiina waa kaga adkaadeene
Nahjaarbay cuneen dhagaxna waa ku arrad beeleene
U adkayste dhibihii nasrina aakhirkii hele e
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Ummaddii dedaashaa ba waa aynigoo kale e
Hitlarkii Ilaaha iska dhigay aaladdiyo xoogga
Oo Urubba wada qaatay oo loo olmomi waayey
Inkastuu bam ku asqeeyey oo saanad ku afuufay
Oo uu eber wershedihii ka dhigay aqalladii buuxay
Iglan keliya baa diiddey inay amar ka dhiibaane
Dabkii ololay iyo geeri war dhabar adaygeene
U adkayste dhibihii nasrina aakhirkii hele e
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Ummaddii dedaashaana waa aynigoo kale e
Asliga carabtu waa boqol malyuun saad u aragteene
Markii ay is wada khaalufeen gebi ahaantoodu
In yaroo Israaiil ah bay awda ka hayaane
Itixaadka weeyaan waxay kaga adkaadeene
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Ummaddii dedaashaaba waa aynigoo kale e
Fiyetnaam arrimihii ka dhacay uunku wada yaabye
Niksan wuxuu itaal hidinayiyo aami badan geeye
Afar dawladood oo kaluu soo acwaansadaye
Afkaartiisa inuu gelin qabtay ula ekoonayde
Aayaha dambaa lagu jabaa kibir la eedaaye

..../5-

Anafa iyo madax taagiddii oohin baw xigaye
Arbaciin lag uu geeyey baan axad ka noolayne
Ukuntii sideeday jabeen aamikaarraduye
In kastuu arwaax badan dilay oo gubey arsaaqdooda
U adkayste dhibihii nasrina aakhirkii hele e
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Umaaddii dedaashaana waa aynigoo kale e
Aljeriya inay xorriyad gaadhayaan cidi ma eegeyne
Awood wuxuu lahaa Faraans way ku istiomaaleene
Ilaah baan damcine waxay rabeen inay idleeyaane
In ka badan malyuun iyo badh baa iilka loo qodaye
U adkayste dhibihii nasrina aakhirkii hele e
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aamino e
Ummaddii dedaashaana waa aynigoo kale e
Eeshiya iyo Afriikaba gun bay beri ahaayeene

Axmaqnimo iyo naxariis darraa loo addoonsadaye
Wixii aradka yiil oo dhan bay orobba geeyeene
In kastay cadaab soo arkeen adiyad loo laayo
In yar baa hadhaye badiba waa tay iska eryeene
Kalsoonida Ilaah baa la jira laysku aammino e
Ummaddii dedaashaana waa aynigoo kale e
Innagana in baa dib u dhacday oo lagu adeegtaaye
Isticmaarku dhaaxuu dulmiyey aradka Soomaale
Imminkana amreeka iyo Yahuud oommaan baa yimide
Innakama fogoo waxay degeen meel agteenna ahe
Marka wuxuu amraayaa sharcigu inaan jahaadnaaye
Xaq nin lihi og yahay ma ambadoo waa maruun imaye
Waa arami godobtii nin qabay kula ag joogaaye
Koluun baa awood loo helaa aaye kaa maqane
Xiddiggii beryo abaaday baa eegga soo baxaye
Aboodiga allaylkii ciyoo awda damin waayey
Islaan dhimata buu shiigayaa eega leeyahaye
Kolkaad aragto ubax laacayoo nuur iftiminaaya
Oo ay fiintu wada aamustoo galawgu eedaamo
Ishaarada nasriga soo socdaa lagu awaalaaye
Annagoo awood u leh ninkii adiyad noo geysta
U adkaysan maynnee dulmiga waan ka aar gudanne
Wax ka mid ah amsaashii horiyo ereyga maahmaahda

Nimaa awlaxaa gelin jawaab kaa ismici waayo
Odayo iyo guddi wax qaban karaa waa afaan jirine
Ergo kaleba daayo sharciga uunadaan fulinne
Ashtago iyo dood Carabiba waa ku arrin waayeene
Odhah laguma helo qaad haddaan eeb kuu dhicinne
Waxa uunka kala saari kara ololka maadhiine
Hadduu ilig xanuun kugu hayaad aad u ledi weydo
Ayaantaad riddaabaad hurdada ka istareexdaaye
Abayaiyo jed baannu u lahayn olole duullaane
Amar buu shicibigu doonayaa guray alaabtiiye
Ataag kedis ah iyo weerar baan ku il helaynaaye
Awelkaan gantaalaha ridnay libi ahaataaye
Wixii uurkutaalliyo dhibiyo urugo kuu geysta
Ayaantaad wax dhabannaanisay ku intihoodaane
Ashtako iyo dabadeed wax dhaca hadal abaareede
Waxba hadalku yuu iga ambane waxaan ku aabeeyey
Tixdaa aan arrimo dhawr weji leh kaga arkaa sheegay
Aan alif ka tiriyoo war badan kuu iftiminaysa
Halkaasaan ambadii joojiyoo ku akhrimaaye
Bisha Oktoobar weligeed allaan guusha aragnaaye
Ufadaa dhacaysaana waa ololaheediiye

Afarguuradeedaa ahaan tii ayaan badane
Af maallada iyo heesaaguna way isku arki doonaane
Iyagaa abaalka u tartami kii awood u lehe
Anse aynigay kuma jiroo waan asluubsadaye
Inta aan ku leeyahayse waa duciyo aammiine
Afraaxa iyo ciidka iyo markii ururka loo joogo
Oo uu ajnebi iyo shicbigu daawasho ahaado
Oo jeeshku aarmiga sitoo aaladdu hadlayso
Oo miigga oogada maraa samada aadaayo
Aad aamikaarkiyo madfaca daymo amakaagto
Oo ubaxo sawd kala midiyo muusiqa afuufo
Ama aad eegto guulwadaha ood kayn akhdara mooddo
Oo calanka laydhu arfacdoo loo abtirinaayo
Oo alif sawiranaayo oo suxuf adeegaayo
Oo waxa ahdaafteennu tahay Jaalle odhanaayo
Oo cadaw ilgabadhleynayaa uurku ka xanuuno
Allow aan indhaha xaasidka ah aammin ka ahaanno.

====

..../7-

Gabay u tiriyey Xaaji Adan Afqallo
Wuxuu tiriyey 23.5.1973
Waxa ka qoray: Cumar Au Nux

Cidi noogu madax maaha caqiidada Islaamka e
Casiiskii Allaa loo carab uma wakiilane
Adinkoo sanam acbudayaan annagu cammiraynaye
Cagta ma dhigin Madiinaba markaannu u cayaarraye
Kuwii aad cadaabteen cashiiradii Rasuulkii
Jacfar iyo colkiisaa casharka noo bilaabaye
Curadkii fitrada Diinta Cabdillaahi weeyee
Ciidda saylac inuu ku dhashay taariikhdaa caddaysaye
Waa cibrad aannu dheer nahay camuum wax ashahaatee
Annagaa cilmiga siinnay cadoeed Bari Afriika e
Lixdan qarnaan jahaad culus caaradhuub u sidanaye
Gaalada caniidka ah annagaa ciqaabnaye
Casha keliya adinkana ciidankiin kama habsaamine
Carrabka iyo Gaeantaba cartaasaannu haynaye
Madowgii adin caaridayey cuurka Afrikoo idil
Kuwaydin calmateen haatan waa colkaannu keennaye
Bari dhexe Cilaaqdii markii laysku cudhumsaday
wax Maraykan ka cabaaday codkii aannu dhiibnaye
Qarbi waxaannu ku cellowney cilladdiinna weeye
Camal waxaannu qabanoo dhan cunto ugama jeedine
Waa waajib nagu culus xaqa imaan caddayne
Casha qudha afiyo gacan adinkama cillaynine
Abaalkaydin celiseen cayda suxufka weeye e
Dhulkayagu cid kama tuugo danihiisa cam ahe
Waa noo cisiyo sharaf codkayagaanu qoranaye
Caddaalad ishtiraakiyo cilmaa lagu habeeyaye
Cadow xaasidaa beenta carradiinna keenaye
Shaqalliyo colkiisaa cadadida ku qaata e
Carrabkuu nebi ku sheegtiyo cadhadii kama dawoobine
Cashaduu khamrada waayo adinna waydin caayiye
Xaggayaga wax caariya cilalka inaanu baadhno e
Cadad boqol malyuunoo cararaan isdaaficin
Islaamkaa casiis nagu ah cidi kama maqlayso e
Waxa adin cabiidsaday col yaree Yahuud ahe
Ciidankaad ka baqateen cashara alif ma gaadho e
Badhkiiba col soo baxaba cadowga u horseeda e

...../8-

Somali cay ma lehe cududiinna weeye e
Caddaaniyo madow uunka midna kama cabsootoe
Dayaan adinma ciileene badahaa na celiyaye
Cawar kama libeysteen dadkiinuu ciqaabaye
Waa neo caloolxume caddilaadda khoorkuye
Dalkayagu cadawgiinna caawimo ma siiyo e
Tuugga adinka soo carara cawda uma gogollo e
Caqli nimaan lahayniyo caammada ma maqallé e
Carruur aad baraysaan Cammiyo Tabaarag ma ihine
Wixii noo caqiibe ah cidi nooma sheegto e
Cajeb wax ah dadaan arag ceebaha ku yaalla e
Afkiinoo Cambaarliyo cuntaa adin hallaysaye
Waa wax laga calaacalo cudurka adin ahaysta e
Iscanaanta Adinkaa caalamkii idinla yaabaye.

=======

Waxa tiriyey: Xaaji Adan Afqalloc
Wuxuu tiriyey: 6.5.1973
Waxa ka qoray: Cumar Au Nux

## JIIFTO

Lixdan qornoo na soo maray qarbaa dunida haystaye
Wax islaaxa kama qabane iyagaa qaraabshaye
Waa kuwii dadka u qaybshey qaali iyo mid liitee,
Qarammada Afriikiyo qaadada u talisaay
Qiyaanadiyo xeeshooda qarbiga mayska eegtaan!
Qaharkay u geysteen caalamka maad qiyaastaan!
Qoqobbaday sameeyeen miinaday ku qariyeen
Qarax bay la sugayaane meesha maad ka qaaddaan
Qilaafyada dhexdiinna ah qummaati maw dhammaysaan
Kuwa dhulkooda laga qaaday qunyar maa u celisaan
Qalloc kastoo ka dhaca dunida iyagaw qareen ahe
Wax qudhiinna adin gaadhay qadder mawgu noqotaan
Miyaan xabasha loo qaadan quwad iyo isyeelyeel
Qiyaas laba malyuun dada miyaan qoorta laga goynin
Kuwii boqorka qaxinaayey qayb miyaanay ku lahayn
Miyaan laysu qoorjebin in xoolaha la qaybsado
Saw tii qasnadihii qolalka Iglan lagu shubay
Qofna ma dilin Kenyato e xorriyad buu ku qayshaye
Xaq qaanuun Ilaahuu doonay inuu qaato e
Intii qool la sudhay baa qasab lagu kaxeeyaye
Mawmaw qac weyn geyste qiiradii dagaalkee
Iyagana intii la qabtay qofna kama badbaadine
Qaabkaa kuwii dhigay qudhoodaa u taliyee
Adinkoo dhibtaa qabay dalkayagan la qaybsaday
Qalad baydin fahamteene qaandhow ma gelayee
Waa qoys walaalkiin ah dhulka lagu qammaaraye
Qasdigiyo ujeeddadu idinkama qarsoona e
Inuu qaran ba qaran dilo qaayahooda weeyee
Halkay qoobka geliyaan qalaanqal lagama waayo e
Bakastaan qisada gaadhay iyagaa qalqaalaye
Qiiqaa Indojina qaharkoodii weeyee
Bari dhexe qiyaamiyo qulub baa ka oogane
Kuuriya u kala qaade quruumo isdilaayee
Yaansmiidh dhulkuu qaatay ayagaw qorsheeyaye

...../10-

Saambiya ayaan qudha qawda lagama daayee
Wax Angoola lagu qubay sunta neefta qabata e
Qabriga iyagaw qoday koofurta qaarraddeennee
Qini way hujuumeen Qaanana inqilaabee
Qaar ka gooye Soodaan Qorraxa-Udhaceeda e
Qudhunlihii Ajuukiyo quwad siiye Shoombe e
Xabaasha iyagaw qoday qaaraqii Lumumbe e
Waa kuwii suryo u qoolay quddubkii Nakruume e
Ninkastoo xorriyad qaata qoryo muda u aase e
Qoomiyadda iyo taxarruur midna qiima kuma lehe
Dabadhilif qarribaniyo qaafillow shaqeeyee
Waa niman qoslaayoo mindi kugu qalaayee
Waa niman hilbaha quuta lafahana qadhiidha e
Waa qori dabloo guba meeshii qoyaan lehe
Waa qalato aadanaha qorrax noolba cunayee
Waa nimanka quudkiyo qudhaba la xarbiyaayee
Dadka uma qabaan inuu Qaaddir wada abuuraye
Waa niman qaloo duba kaan jaraha qaadane
Waa niman qiyaaniyo ku qadhaabta tuugo e
Qawleysatada weeye qarribaaya dunida e
Ima qabato kii yadhi waa niman qisaasa e
Waa cudur qanjaha gala sambabadana qooma e
Quwad nimanay kaga biqin naxdini uma qabato e
Ninkii talo ka qaataba qoomammaw dambaysa e
Qasaare adin gaadhaa ayaga waw qaniimade
Qarammada Afriikiyo qaadada u talisaay
Ninkii qayliye ahoo qaad iyo dhac laga wado
Adinkuba Guddi u qaybsha qumbuu yuu dillaacine.

=======

Gabay uu Tiriyey Xaaji Adan Afqalloc
20.4.1973.

Maroor waa qallooc dawna waa toos la marayaaye
Mergi waa cad hadalkana mar waa lagu masaalaaye
Macaan waa run beentiina waa mur iyo deebaaqe
Muddana waa halkii lagu ballamay maalintay tahaye
Maaw!Waa shiinnida kaaluftaad malab ka weydaaye
Magoolna waa dhirtoo xay ka baxo milayga jiilaale
Mugdi haddii la yadhi waa gudcariyo meelaan nuur jirine
Matuul waa wax kuu muuqd oo meel fog kaa jira e
Miiq waa dun maro lagu toshoo kuu manaafac ahe
Mareegi waa xadhkaha lagu xidhaa maqasha xoolaade
Muus waa kan lagu xiirto iyo midaynnubeernaaye
Magallooti dumarkaa dirtoo waa mansuukh nina e
Maydi iyo muxur waa lubaan magacyadiisiiye
Maroodigu ugaadh weeye gala meesha duurka ahe
Maqaarna waa hargaha xoolaha oo qaarba waa midabe
Miyirku waa caqliga fiiro badan muruqna waa xooge
Muskuna waa duddada reerka oo ood la mariyaaye
Mooraduna waa faal wixii maqan la sheegaaye
Miiraale waa roob da'a oo mira habeenkiiye
Macaashna waa wixii laga helaa maal la iibsadaye
Miis waa galaan iyo wixii lagu masaalaaye
Maaleeyo qudhacaa lehoo waa madowdahaye
Magaanyaduna waa naag xunaan garanin maamuuse
Magligu waa hub layskaga rabaa nimaad ismaagteene
Mandharaari geelaa leh adhi malawad weeyaane
Macnihii kasta ha loo wadee meeli waa xubine
Maryuhu waa dharkaynnu huwannoo lagu mushaaxaaye
Nin ku yadhi muhlad i sii qasdigu waa muddiyo goore
Maalna waa wax ruux leeyahoo mood ah ama noole
Mayana waa waxaad diidan tahay midaad tidhaahdaaye
Masalwhuna waa harag wadaad mudani qaataaye
Marashidu bir dibi lagu xidhoo mici leh weeyaane
Manjuhu waa kuwaa lagu socdoo meel ku geyn kara e
Kaa maarmay waa nimaanad rabin midaad tidhaahdaaye
Maqalku waa dhegaha muuqna waa midaad arkaysaaye

Mayalku waa kan gaashaanka iyo meesha la qabtaaye
Mooyaale waa nimaan ogeyn meeluu joogaba e
Mudae iyo maxaadh iyo mindiyi waa muleen dumane,
Waa mayrae galabeed kolkuu maalku soo galo e
Maah waa ei nacaskiina waa miic wuxuu yadhiye
Midig waa gacmaa tooda mudan waw makaab bidixe
Midna haddii la yadhi waa hal qudha maalin kay tahaye
Mudkuna waa cad geel laga jaraa miidi waa subage
Haddii aan ceel ma'wi ahayn biyaha yarina waa maaxe
Martidu waa dad kuu hoydayoo kaa manfaca sugaye
Maari waa naxaas dahabna waa shay macaadina e
Marwo gaari weeye iyo naag meelmaroo wacane
Mukulaali waa waxa bisado lagu magcaabaaye
Malowgu waa kan cuna mulaca oo malaha waabay e
Maggeyadaduna maalkay u tahay lama muquunshaane
Mucsirra waa qof maal iyo itaal aan midna lahayne

Majeertu waa waxyaal ku cajabshaad marar ammaantaaye
Miskiin waa guryaha kaa baryaan maal adduun qabine
Murquf waa wax badan oo lumay midhadh ka joogaane
Magtuna waa adduun lagu baxshaa mayd la gawracaye
Misciriri waa irdaha buuxsinnada lagu makaabaaye
Markii la gedlo geel wax xiga inuu moggaabaaye
Moggaabaduna waa caanahoo mid u cantuugaaye
Musarreen dabayl weeye dhaca milayga jiilaale
Magdhow waa wax qaaniyo gashiga laysu mariyaaye
Muraayadina waataan wejiga marar ku eeghaaye
Muurre iyo mari waa shibmiroo midiba waa jaade
Moxogga iyo mooh iyo mawadu waa dhiroo midiba waa cayne
Maddanaha wax baa lagu suntaa waa malluug birahe
Mao waa ubaxa geedaha ka baxa meel barwaaqaahe
Meleggu waa kan xuuxoo dhan dila meelu joogaba e
Marmarsiinyo waa tuhun qofkii loo musuusuqiye
Masiibana dhibtii kugu dhacdaad mudato weeyaane
Madali waa halkii lagu shiroo talo la meershaaye
Markuhu waa hadhuub lagu lisaa maalka oo dhalaye
Maanlaawe waa nimay dantiis kala maqnaadeene
Madagtu waa dab laba qori gacmaa lagu muquunshaaye

Magaan waxa la yadhi faraska aan magane dheerayne
Muggu waa intuu qaado weel waxaad ku miistaaye
Madaddaalo maaweelo iyo maadi waa hadale
Muraadkaa hel!Waa duco nimaad mahadinaysaaye
Magani waa adoo baqay ninkii kaa mudaafacaye
Maagna waa dulmiga godob la'aan lays mahoobbiyaye
Makruuhna waa qofkii lagu qasbaa midaanu doonayne
Haddaad muusannow maqasho waa meel dagaal dhacaye
Mas waa bahal cadaw ah oo sun iyo micilleh weeyaane
Muramahaa afgaranwaa leh iyo cadh iyo muusoode
Muftaax waa kan daar lagu furiyo meelo kaa xidhane
Macaan waxa leh soorta iyo hadal maanka kaa dega e
Milic waxa la yadhi waa qorrax iyo mar aad hadh weydaaye
Madluun waa nin washay caqliga kala maqnaadeene
Murjisku waa bir gaabanoo ulle oo marar la qaataaye
Macasha idaha shilis baa lehoo madaxa waa qaare
Maanku waa kan laga fiiriyaa xaajo kaa maqane
Masayr waa wareer dumar helay murugo qaadaane
Miciin laysu galo baa jiroo waa musaayaro e
Minyaro iyo minweyn labadu waa meher wadaagaane
Murtad waa islaan gaal noqday macatab siiyeene
Murug waa xadhko isku xannibmaan maaro loo heline
Mardar waa warmaha laysku dilo kan ugu muuq dheere
Marmar waa kan geel dhagaxna waa lagu magcaabaaye
Maddiiddada wadaad baa qoroo muxubbo weeyaane
Madhaxna waa waxaad kaydsatoo loo muxtaad yahaye
Waa macawis maradii guntiga lagu majiiraaye
Miiroogu waa qaadka oo lagu marqaamaaye
Mirimiridu waa geed ka baxa meel magaala ahe
Muquuno waa waxaad bixiso ood mudane siisaaye
Baddoo murugtay baa lagu arkaa mawjadaa kacaye
Malax wax yeesha nabarkii buka iyo maralka feedhaade
Masjid waa halkii lagu acbudo maaligga Ilaahe
Waa magac islaamuhu baxshaan mooge kay tadhiye
Mirena waa habeen kii dhashaan cidi maleyneyne
Mayeedhe waa ilmaha gibina iyo mici gabaar awre
Macallin waa aqoon iyo wax barid loo muxtaad yahaye
Marso waa dekado xeebaha iyo madax daruureede
Madaar waa dameer qayliyiyo hadalka maangaabe

Majirto waa asluub been ah oo maro la saaraaye
Maragna waa qof xaaluu ogaa muran ka joogaaye
Maandhaafna waa shay waxaan jirin la moodaaye
Maad iyo mashxarad waa cayaar meel aroos jiro e
Milixdu waa kan soortaah lahayn laga mayiigaaye
Magaad buurigaa lagu cuhaa muuqa waa dhagaxe
Mandheeri waa duhaadh ruuxa dhala maqashu keentaaye
Markabna waa kan badaha maroo maal ka soo gura e
Mushaawirona waa hadalka oo talo la meershaaye
Madhayaduna geelay gashaa madaxa hooshaaye
Ha manaagin ruuxbaa la yadhi midaanu gaadheyne
Maradhaamo caawino iyo miciin waa muraad qumise
Maamuusku waa sharaf haddii lagu marweeyaaye
Maskaxdu waa tan laga fiirsadoo madaxa weeyaane
Masalo waa su'aal laga rabaa tii munaasiba e
Maqaam waa halkii lagu gurtaa maal siyaado ahe
Maleel iyo cajiin iyo mulaaq waa middaa qudha e
Maqaanaha fardahaa loo geshaa madaxa waa jookhe
Minhaaj waa kitaab uu sitaa shiikh mufti ahaaye
Madhan waa habeen kii dhashaba foqor ka muuqdaaye
Malcuun waa iblays gaalna waa kii masiixi ahe
Minaw waa dabciga mudanena waa magac ninkii weyne
Madmado waa luqluqo iyo afkoo la iska maydhaaye
Mudmudna waa jiraa oo dilkay marar ku sheegaane
Musaamaxadu waa kii dembi leh maraad ka dhaaftaaye
Melmel waxa leh awroo dhanoo magacu waa caadhe
Makaraanku waa qori kan jaray maal ku doon yahaye
Meygaaggu waa geed dadkana qaarki waw magace
Maasna waa hargaha dhogorta oo laga magdeeyaaye
Madiix geela waa loo baxshaa magacu waa luuqe
Midi waa wax qudha oon lahayn shay mataano ahe
Mugca iyo muqur waa biyuhu meelay ku hadhaane
Muudaagu waa waxaanad filin maray yimaadaane
Masaasac waxa la yadhi lama gartoo waynnu maqallaaye
Waa magar manjo cad baa la yadhi maqasha geel qaare
Mammanaantu waa rag iyo dumar miday wadaagaane
Muraad waa dan meermeerna waa maraad wax weydaaye

Munkir waa su'aal aanu qirin kaad markaa tadhiye
Marwo waa xishood dumarna waa lagu mageaabaaye
Musmaar waa bir loox lagu mudaa murugna waa ciile
Ismaqiiqa miidaamo waa midaan isdhawreyne
Manso waa tan cagaley la yadhi midab yaxaasleye
Mayiig waa shakiga iyo waxaad yare ka maagtaaye
Haddi maah la yadhi waa afkaar lagu maqnaadaaye
Mayuug waa dedaal waxaad markaa maagto qabadkiise
Milshi waa waxaad filato iyo xaajo kaa maqane
Muqays waa sabaal neefka dida loo maldahayaaye
Musuqmaasuq xeelad iyo dulmaa lagu macneeyaaye
Maydhax iyo maleeg labadu waa muunad kebadeede
Miir waa biyaha dhoobalaad maax ka dhurataaye
Murtidu waa codkii qiima lahoo maanka kaa dego e
Maahmaahdu hadalkay u tahay shay munaasiba e
Malafku waa cagaar iyo naquu maalku cunayaaye
Miis waa qof uu quudhayaa kuu markaa yadhiye
Marna waa wakhtiga keliya oo waa macnaha goore
Moodmood haddaad tadhi shakibaa meesha soo galaye
Mugakaallii waa dhuumashada dhabarku muuqdaaye
Dumarku waa marsaday baa la yadhi maro guntiina ahe
Malko waa rug maangaabna waa kaan macna lahayne
Macangag iyo magmaag waa qofaan cidina muunayne
Maraqna waa kan geel lagu mariyo midaynnu fuudnaaye
Ma macaa la yadhi neef hadduu weyd markaa yahaye
Malka cudurka geel laga gubay maqashu yeeshaane
Fardahaa maydal qaarkood la yadhi murena waa weele
Muqdmadda iyo maxawajkuba waxay noqdaan madhax dadkaw yaale
Muurmuursi waa nimay ilkaha maqanyihiin qaare
Midkastoo gargaar kuu galaa waa macaawino e
Waa nimaan muraad kaa lahayn kii mashiiqsadaye
Musgal waa ninkii kula degoo kaa manfaco sugaye
Middii caano badan xoolahay madi yidhaahdaane
Wax la yadhi mayeelana nimaan maqallin weedhaaye
Madgartu waa kan geed kale ku maran oo makaabsada e
Maadha cawsaskaa laga ridhaa waa mid qaayo lehe
Maddiibad iyo mullaax iyo wax jira moodda-galabeede
Baddaa maayad lehe waa biyaha waxaynnu moosnaaye

Mafafi waa babbay kaynnu nadhi magaca Somale
Maskaad iyo muskaab waa dugsiyo meel gabbaadsiyahe
Merged waxa la yadhi waxaad liqdoo taagan meel dhexe e
Murrug waa cadhada ruuxa qaba dhiigga muudsada e
Murduul iyo mardhoof sheekaday marin yaqaanniine
Gorgorrada middoodii dheddiga waa manyaa nadhiye
Makiinado alaab ferenji baa lagu magcaabaaye
Maab waa qiyaastii dhulkoo maaha hadalkeene
Madheedh iyo maqaari iyo muqlo iyo morohi waa kayne
Waa muudsaduu yadhi qofkii shey macaansadaye
Nin masaafo dheer soo socdaa maalin gaale ahe
La ismood haddeeru yadhoo mooyi say noqone
Ku meel gaadhku waa waxaan lahayn madhax la tuugaaye
Mashquul baan ahuu yadhi maruun baad isoo mariye
Maal lays siiyaa jiroo maali waa nabare
Mitamis waa waxqayb mahadhana waa miday xasuustaane
Mastuur waa wuxuu qariyoo maqal u diidaaye
Muqluhu wuxuu dilaa geela iyo maalka oo idile
Moog caanahaa lagu shubaa waa mid jaandiyahe
Maaqmaaqu waa waxa dhinmoo naqas ka muuqdaaye
Muquur waa baddaad quusto iyo maan la'aan soco e
Muoda iyo mufta iyo mabtu waa sanqadho maray islaayaane
Haddaan miidanday jirin arrini moqolos weeyaane
Maxay waa su'aal aan dhammayn kii markaa yadhiye
Masaasaq waa maryaha qaar xidhoo muuja cawrada e
Kuma mudan macnuhu waa anaan kaa manfaco sugine
Madaxay basaasay tadhiye maandhe ii subage
Muddo hashii aan rimin baa la yadhi waan la marayayne
Xadhkaha cawsku waa mooliyoo maydho waa falage
Maso waa isu ekaan wixii midab wadaagaaye
Mani waxa leh qoodh oo biyaa lagu magcaabaaye
Mashmash baannu kaga daadinay marar yidhaahdaane
Minka aqalka iyo faalku waa miday wadaagaane
Middaad filato oo weydo bay mohad yidhaahdaane
Murdu iyo mirood iyo wax jira lama maleeyaane
Maydaanku waa gola shir iyo meel muqaabilo e
Mayay waxa la yadhi roobka da'a maalin goor hore e

Maahirna waa nin xaajada bartaan lagala maarmayne
Mirkac waxa la yadhi ruux gudoo meel ku geeddiyaha
Maato waa dad caydhoobayoo meel ka soo qaxaye
Maxafal waa halkii ururahoo madaxi joogtaaye
Waa miilo gabay baa la yidhi maalka weydda ahe
Muquunada aan fiicnayni waa shay muqaayo ahe
Quraar qoraha miinshaartu waa meheraddiissiiye
Modhoodho waa sanacada tii xunoo waa macno la'aane
Murkuddaa udayg laga guraa meesha xiiska lehe
Maac waxa la yidhi hadal xunoo maqalku diidaaye
Madwarna waa fargale dahaba oo waa mid qaaliyaho
Muhmal hawshii gabe weeye oo mayllinkaa birahe
Waa murudsataa ruux la yadhi weelka oo madhane
Manduul dheriga xaabada ku baxa madowgii weeyaane
Marmaris waa tirtiris iyo safayn meel nadiif raba e
Muleenku waa alaabo aan lahayn qiimad meel mara e
Murkukuucsi waa socod xun iyo meel ninkii jabane
Wax kastaaba muulkoodu waa kii u magac weyne
Makhaayaduhuna shaahay gadaan loo muxtaad yahaye
Ninka timirta goosarana waa lagu magcaabaaye
Waxaad ma aha tadhi waa kolkan midaanad yeeleyne
Ma ogi waa warkii aanad hayn midaad tidhaahdaaye.

============

Gabay Xaaji Adan Afqalloc,
Wuxu tiriyey I3.4.I973,
Waxa ka qoray: Cumar Au Nux

I. Masuuliinta badhasaabbadiyo maayirrada oo dhan
2. Nin waliba malkada uu fadhiyo maamulkiyo hawsha
3. Waxaan magansanaynaa shareiga inanay moogaane
4. Maroor kuma gasho e taladu waa lagama maarmaane
5. Marwooyin iyo raggaba waw dhexiyo miilo iyo qaybe
6. Ninna kelidii wuxuu maamsadiyo maaha xoog xooge
7. Mabda'a iyo diintayna faray inaan midownaaye
8. Maabiyo tilmaan bay Goluhu amar ku muujeene
9. Inuu shieibku taladii masalo waxa muraadkood ah
I0. Oo ay mushtarag kula noqdaan madaxda loo geeyo
II. Oo qoomba meeshay degaan muujiyo awoodda
I2. Oo ay magaalaba tan kale maagto inay dhaafto
I3. Oo uu masayr iyo tartame meesha ka abuurmo
I4. Waa waxa dadku heruuugu maray meeluu joogaba e
I5. Adinkuna jidkaa inaad martaan waa mid waajiba e
I6. Maskaxdii faya qabtaaba waa miday u aydaaye
I7. Guddiyada rag miisan lehiyo maahirro u doorta
I8. Ninkii shalay lafaha muudsan jirey maanta ka ilaasha
I9. Maeruuf iyo walaalnimo male iyo midaad taqaaniine
20. Musuqmaasaq yuu iman horuu meel u buuxsadaye
2I. Maqaarsaar kuwo ah oon ku dhicin maya suaashiinna
22. Iyo kii mabda a diiddan oo marad u hoos eeyo
23. Iyo kan ugu maal badan eidda oo laga mildhaawaaye
24. Iyo muutamuutaha gudee hadal la meeraaya
25. Iyo kii Afmiishaar ahee malafsi doonaaya
26. Iyo haybta mid adiinku yami miidha reer hebel ah
27. Iyo kii mudduci ku ah qabiil meel fog lagu aasay
28. Iyo kii mushatari loo diroo ribo ku maydhaanta
29. Iyo tuugga lacagtii madhshee maqalka boobaaya
30. Iyo muhindi skiyo meel dhisaha wada macaashaaya
3I. Iyo Aw maryoolaha sidii maris wareegaaya
32. Iyo muqafalkii aan ogeyn meesha waxa jooga
33. Iyo daraan mastuuroo hadhow soo mudh odhan doona
34. Intaasiba mamnuuc waxay ka tahay talada reer maadhe
35. Nin mutaeasib ahiyo daallin yey meesha soo geline

36. Kolka uu magoolku isu hadho madantanaw guula
37. Nin waliba war meeshuu ka sido madaxda haw sheega
38. Dabadeed muxaawarada iyo muran ha oognaado
39. Ninba wuxuu u muhanaayo dood maqal haloo yeesho
40. Aaraa mukhtalifaa jirtee sawd ha lagu meersho
41. Halkii midigta loo badiyo dhiga xaajadii muhim ah
42. Adinkuna markaa fuliya waa tii aad mudateene
43. Wax kastoo mashaakila ku wada magaca qaanuunka
44. Majliska weyn u dira tii kolkaas laga maqaam gaadho
45. U miyiriya xaajadu fudayd waa murkucataaye
46. Kuwaa jira malaasoo dembiga xidha madluunkiiye
47. Markii laysu madax taagi jirey maaha sebenkiiye
48. Nin waliba milguu leeyahee mariya xeerkiisa
49. Murtidii Siyad adinku yidhi maanka ku adkeeya
50. Magliga hawla bixinee shicbiga hadal macaan siiya
51. Maguugiga intaa soocataan maqashu yay haydhmin
52. Maska iyo abeesada dila oo mulaca kaalmeeya
53. Miskiinka iyo kii baahaniyo maatada ogaada
54. Miyiga waxa mashaqo jooga iyo mudunka soo eega
55. Haddii ruux masalo adinla yami milicsadoo fiirsha
56. Ujeeddada muraadkiyo qasdiga miimka ka higgaadsha
57. Miyir ula wad adigaan sharciga meella ka halmaamin
58. Adigoo aan maaxda uga dhicin mayada haw dhiibin
59. Naseexadu haddii aan layska maqal waa mujaadilo e
60. Waa murugo nimaad waanisoo kaa mashiiqsadaye
61. Wixii miinagaba xoolahaa laga muquunshaaye
62. Annana uma muxtaaj ihin nimaan meeshii ka adkayne
63. Waa mahadho sharaf aan la dhigin meel u laayiqa e
64. Waxa lagu marweeyaa haddaad magaca dhawrtaaye
65. Garoomuhu haddaan xaqa la marin biruhu waa maare
66. Maryaa lagu tolaye kama ay bixin meel jidhkiinna ahe
67. Ninkaan shaqada maamuli karayn ma lihid weeyaane
68. Ma moogidin Kacaankeenna iyo maanta suu yahaye
69. Meeshaynu gaadhnaan khalqiga cidi malayneyne
70. Macalqabadka nimankii lahaa miridh ma seexdaane
71. Mintidiyo dedaaliyo karti bay mahad ku yeesheene
72. Masaal bay Afriika u noqdeen miday ku daydaane

...../20-

73. Nin mucaarida iyo baan qirayn qaafilkii madhand
74. Midna niman arkayn wax u sawa ah maaliniyo leyle
75. Ismalaakadeed waa runtaad maya tidhaahdaaye
76. Wax muuqdaa mahiib geli karee maluhu waa beene
77. Maraggu waa waxqabad la arkayee maaha waah falaye
78. Maqaan weyn wax lagu gaadhi karo daacaddow mudane
79. Nin ragaa milgadii buuxiyee doqoni waa meyde
80. Midhihii mayeygiyo ku baxay mawjadda Oktobar
81. U maleegta inaad soo gurtaan miiddu yey qubanne.

=======

Waxa tiriyey Xaji Adan Axmed (Afqallooc)
wuxuu tiriyey Idii Abril I973
Waxa ka qoray Cumar Au Nux

## J I I F T O

Soo eridey Haanoy saaxirkii Maraykane,
Carabtuna inay siiso saliddii u diiddaye
Waxay Sahaminaayaan sudaha geelu daaqo e
Dadka waxay ku sabayaan sareedaanu keeniye
Nin sunnaarad dheeriyo sugaal buu bahaystye
Sirtii waxay u jeedaan soofku inuu dhammaado e
Nin saan jiidanaayaa sanqadhtirasho ma helee
Shicibkayagu ma seexane soojeede weeye e
Saryankuba dameer garay geeso loo sameeyaye
Nin sinsaaro nala dooni sambab nooma ruxayee
Seef nalagu gawrici surka uma dhigaynee
Ninkii solay ku laqanyooday sarar baw horreysaye
Sortayadoo rag kale cuni hambo kama sugeyno e
Saddexdii wallaahiye sidaa yeeli maynee
Suryadabin naloo qoolay sudhanmayno lugaha e
Sunta cadawgu noo sido saruu laacimayno e
Sacabbada u dhiganmayno subag nalaga xooga e
Sandareero lagu shubay sanka ka leefimayno e
Sed-dheeraad nin naga doonay kama salax rogeyno e
Sidigtaannu leennahay dhidar sacabin-maayo e
Xaqayaga ninkii sida kuma saamaxayno e
Saaqa iyo Deeqiyo Suubban kama hadhayno e
Somali waa mide kala soocimayno e
Safkaan wada geleynaa marka siidhi yeedho e
Siyadiyo Golaha sare ballan baannu siinnaye
Waa sida mabda'u yahay iyaga inaan la socono e
Dhammaan waxaan sugeynaa amar laysa siiyo e
Saacadday tilmaamaan salabkaannu qaadiye
Nin walbow sidaa maqal sahlanmayno xaalka e

...../22-

IO.I. 1973

## GABAY

Dabka adiga ka qiiqayiyo qaraxa laabtaada
Qalada iyo bilawgaad cidlada qoonni qabanayso
Qiirada ku haysiyo bushmaha qolofta jiil awdey
Qoolaabankaad godatayee quluusha kuu yeeley
Quudkaanad cunin soorta oo kula qadhaadhaatay
Qamiirka iyo tiiraanyadaad qaanac ku ahaatay
Qadhqadhyada ku haysiyo wadnaha laydhu kaa qabatay
Adiga oo qayiranoo hurdada jiifka qaban waayey
Qaalaalligiyo eegmaday qoortu kula liicday
Adiga oo qolfiyeyoo naftii meel fog kaa qabatay
Qaadhaan saluuggiyo fahmada kaa qormoo habaabtay
Qulubka iyo tiraanyadaad qaadi kari weydey
Qaybtaanad ku lahayn haddii hadal la soo qaado
Jidhkaagaa qawaawirey sidii laan qorraxi hayso
Quwadda kaa dhammaatiyo adoo qalin ka dhuubnaaday
Dhulka aad qodeysiyo tashiga qaallo bixi waayey
Qamuunyeysigaad labada fool dibinta qaar goysey
Qosolkaad allowdiyo afkaad qaawinta u diiddey
Xirribaha ilmada soo qubayoo dhabannadii qooyey
Intaasiba qalbiga caashaqay kugu qiraayaane
Qammigiyo hammiga laga dhaxlaa lala qabiibmaaye
Qabow iyo kul buu leeyihiyo qoomamiyo ciile
Waa quduro waallidana waa lagu qiyaasaaye
Waa qodaxda feedhaha muddiyo qaaxadoo idile
Waa waxan bir kuu qaadinoo dhiigga ka quba e
Waa qumay qofkuu helo dawada lagala quustaaye
Nin qardhaas qoriyo sheekhyaday kala qaloodaane
Qummaati uma muuqdo ee jinkay qolo wadaagaane
Qooliyo jaruu leeyuhuu kugu qafaashaaye
Qisaasna ha amro e wuxuu ku yidhi waad qadderisaaye
Kol hadduu xadhkaha kugu qabtuu qoorta kuu geliyo
Wixii qaaliyoo culusba waa inaad u qaaddaye,
Ha u qaadan xaajada wax yare waa qar soo dumaye
Baddaad quustey waa midaan lahayn qoorri iyo xeebe

Wax badan qaraam duufsadaan qudhi ka noolayne
Aniguba qabriga waxaan u tegey qaanso iyo leebe
Imminkaan wixii iga qabsaday weli qandhoodaaye
Nin abees qaniinaa yaqaan geed qaraarshaha e
Isagaa wuxuun kaala qaban qaabka aad tahaye
Ha ka qarin hortaa nimuu jaceyl qoomay baa jira e.

========

## G A B A Y

Xaji Adan Axmed Afqalloc oo ka mid ah Guddiga Af Somaliga, wuxuu gabaygan tiriyey Arbacadii, bisha Discembar 26kii, 1972.

Wuxuu u tiriyey sartan leegadii hore degganaan jirtey, imminkana Guddigu ku shaqeeyo. Wuxuuna munaasabad uga dhigay maalintii madaxweynuhu furay dhinaca cusub ee hadda la dhisay. Wuxuuna yidhi:

Sartan daacad baa lagu dhisiyo saad xornimo doone
Markii xigay sabaannaa galayiyo saaxirriyo tuuge
Suuq lagu gataa bay ahayd shicibka Somale
Dhulka siman kuraasida sallaxan buugta kala soocan
Halkan aan suuraddeenniyo wejiga saaka ka arkayno
Sukunkii bisadahay ahayd guri ay seexdaane
Sankaa laga duwanayoo wax jiil suniyo waabay e
Iyaddoo sidaasay qabteen soomajeestuhuye
Kolkii qudhunkii laga saaray oo saqalkii loo diidey
Oo aqallo laga subbiyoo siinad laga buuxshey
Saldhig bay fartii oo la qoray uga sameeyeene
Saddeexdii waqtoo soo maray bay qaarba si ahaayde
Ilaah baa samaan ugu bedeley silici waagiiye
Isagoo midabka surad uga egoo sagal la moodaayo
Caawana Siyad baa ku furay suuratu-ikhlaase
Waa noo siraad baxahayiyo seermaweydada e
Safka madaxda segeteerradiyo suubbanow adiga
Annagoo soo dhowada adin lehoo adin salaamayna
Raggiinii dalka u sarakacow same ku noolaada.

==========

Gabay Xaji Adan Afqalloc
Wuxuu tiriyey I5.I2.I972.

Ishtiraakiyadu waa mabda'a lagu islaaxaaye
Aqoon iyo cilmaa lagu dhisiyo xaqiyo iimaane,
Waa noo iftiin iyo dariiq aayatiin badane,
Ma oggola nin keligiis isyidhi adigu noolow e,
Ma oggola adduunyada nin lagu aaminaa dhaco e,
Ma oggola afmiishaarrada iyo kii acwaansada e,
Ma oggola nin tiisuun arkaan eegin meel kale e,
Ma oggola fidma-abuure iyo kii idaaciyahe,
Ma oggola anaaniyada iyo abiyo reer sheege,
Ma oggola abtuu ii yahay iyo waa ina Aw Hebele,
Ma oggola aday garanayiyo ina-adeerow e,
Ma oggola arjiga soo qoroo meelo ka asteeye,
Ma oggola garsoor eexda iyo kii ugaadhsada e,
Ma oggola ilaashaha la xada adhiga tuuggiiye,
Ma oggola af nala heesayoo uurka maal ku lahe,
Ma oggola annagu Tawraddaan uunka ka xignaaye,
Ma oggola nin aargudanayoo aano doone ahe,
Ma oggola kuwii lagu ogaa aaminaad li'iye,
Ma oggola akhbaar aan la hubin odayadow geeye,
Ma oggola ninkii qalad arkaan sheegin iimaha e,
Ma oggola ajnebigii ninkay cahad lahaayeene,
Ma oggola dembiga axad faloo lagu ismaa qoome,
Ma oggola axmaqa hawd jiree wada Israaiile,
Ma oggola ibleys fooxle iyo awga faasida e,
Ma oggola mas'uul aan ahayn aamin daacad ahe,
Ma oggola ismaqal li'ida aan la is-addeecayne,
Ma oggola albaab igu qafila yaan la ii imane,
Intaasoo umuuraa jirtoo lagu adeegtaaye
Wax asbaabta wada niman yaroo waayey laba eefe,
Amniga iyo khayraadka iyo ubaxa laacaaya,
Waa daraan ogeyn waxa ka dhacay aradka Somale,
Idaaradaha qaar aan isbedelin baanu aragnaaye,
Addimada iyo waa caafimaad oogadii sare e,
Waa ubucda dhexe meesha aan aah ka leenahay,
Iyadaa dabib u egyahuu arami jiifaaye,
Irriddaan bannaynaa xaskii weli agyaallaaye,

...../26-

Halkii oodda weyn laga riduu aasan yahay shooge,
Abriskii sunta lahaa godkii ka ag fogaan waaye
Weli wuxuu aboodigu cunaa ugaxdii hoo ƚiile,
Uuru haddii la yami daacad bay wada ahaadaane
Abad tawraddeenu ha jirto bay odhah ku baaqaane
Ujeeddada ma muujaan waxay ku isticmaalaane,
Arrintiisu nimaay gaar tahoo noo isu egeeye,
In kastuu asturo ceebta waa lagu arkaayaaye,
Aqalkuu galaa sheega iyo agabta hoos taalle,
Kun jeeruu albaabada xidhuu eedda qarinaayo
Ninkii aradka khiimaa qudhmuun nooga soo uriye,
Dartoodaa ol'olahaa la wado loo abaabulaye
Annagoo dadweynaha ahoo xaqa addeecayna
Musuqmaasaq kii lagu arkiyo eexashiyo tuugo
Inaan loo arxamin oo ciqaab lagaga aar goosto
Iclaankii goolaha sare yidhaan ku ayideynaaye
Aqballaye guddoonshaha sidaa naga ogeysiiya.

\=\=\=\=\=\=\=\=

Gabay Xaji Adan, wuxuu tiriyey
12.12.1972.

## HAWD

Axraarnimo dadkii doonayoo xaq iyo iimaan leh,
Abboolo iyo doollaar bataa kama adkaadaane
Waa kaa Amreekaan ku lumay aradkii Feetnaame
Rag awood ka roon baa halayoo eede kibirkiiye
Ayaan oolba boqol bay ridaan Eerimayllada e,
Aamiga iyo guutooyinkii lagu ijbaaraayey
Intoodii badnayd waxa la dhigay kayn awaare lehe,
Sida ugaxda baydkay jabeen Aamikaarradiiye
Arbaciin lag baa lagu qaderay inay ibaadeene
Intii soo hadhayna jeelahsaa lagu ilaashaaye
Anafada iyo madax taagiiddii oohin baw xigaye
Kolkii bari fog laga soo eryayoo laga il roonaaday
Isagoo Israaciil watiyo qolo Afriikaan ah
Inuu Howd alaabada dhiigtaan helay akhbaartiiye
Ololaha maraannu u kacanaye tuugitii la ataagay
Afmiishaarradii cararay buu soo abbaansadaye
Ummadda iyo diinta iyo dalka uu Eebbe nagu beeray
Ayaan qado ah bay doonayaan inay ku iibshaane
Wax kalluun arkaa hilib yaroo lagu ugaadhaaye
Afka markuu geshaa baa birtii aad u qabataaye
Kolkaasuu idaad loogu xidhay dabinka eedaaye
Adhigu gawracoo lagu waduu orad cayaaraaye
Isma oga e inuu daaq tegi bay ula ekaataaye
Uurki-ushaqaystaa ka dhigan lagu adeegtaaye
Indhuu shicibkayagu leeyahay iyo aragti xeel dheer
Ma oggola mawaashigu inay idil dhammaadaane
Ban abaar ah arad kaashif ah oo ayda laga gooyo
Adduunyadoo sun lagu laayo oo kaynta la idleeyo
Ummaad wada dhammaan caydh ah oo tuban albaabkiinna
Ujeeddooyinkaa leedihiin waa umuur culuse
Irbado cudur ah iyo baad siddaan eebadii meleg e
Asligii yahuuddaad tihiin beledkii Eelaade
Addin halkaa diigtaan dunida waad ololineysaane

Masjidkii Aqsiyo baad gubteen xaram ibraahiime
Adinka iyo ibleyskaa nacladi oogadiin tahaye
Dameer adame geesaha bioiid uga ekeysiiyey
Afkiisii caddaa buu arkoo eegayoo didaye
Annaguna arrimahaad waddaan waa ogsoon nahay
Isticmaar beddeley baad tihiin aayihii hore e,
Wixii aarmi lagu waayey baad odhah ku doontane
Axmaq daallima oo nacasa iyo udo cun mooyaane
Arki meysid Somali yadhi waydin aaminaye
Dalakayagu ahaan maayo saad adinku mooddeene
Umaadda kuriyaan kala mid nahay olole duullaane
Malahay waad allowdeen sidaad ugu idlaateene
Arrintaad dhigteen bariga dhexe waan ka aar gudanne
Af libaax intaydaan ku dhicin aayar naga guura
Haddii kale Ilaah wuxuu ka dhigo naga akhbaar dhowra.

=========

Waxaa tiriyey Xaji Adan Afqalloc
Wuxuu tiriyey Nof. 3, 1972.

## FAR SOMALIDA

Mudduu shicibku rabay inay far qoran magane yeeshaane
Kolkay madaxdu sheegtay xamdiyo mahad yidhaahdeene
Madad buu dadweynihii ka helay meeluu joogo ba e
Intay mu'ayideen bay miyuusig u garaaceene
Sidii nimanka miiraha cunay ugu marqaameene
Waa taas mashxaraddii guryaha laga maqlaayaaye
Mastar iyo Sinyoor waxa bedeley magacii Jaallaha e
Mubaayaco la dhaaf iyo nin yadhi taaydaa mudane
Wadaadkii masalo gaab ahaa muramihii daaye
Layskuma masayroo la tuur tay masalayeene
Marmarsiinyo lagu soo gabbado meeshii laga saarye
Waxa muuqday Somali aan midab ku dheehnayne
Nin waliba wuxuu maansadiyo malihii beenowye
Muddo boqol gu ah baa dhaqankayagu naga magoognaaye
Malcuunkii gumeystaa dilay iyo qaar mucaawinaye
Mugdi baannu soconayney iyo meelaan nuur jirine
Mabda'a iyo dhaqaalihii hadday horuu maraayaane
Maantuu bilaw yahay codkeenno laysku maamulo e
Ka macaan magaabada listiyo malabkii daaloode
Maskaxdii jirro qabtaa dayaxu waw madaw yahaye
In yaroo qalbiga maal ku leh baa murugo haysaaye
Waa mahadho taariikh ah iyo madhax la tuugaaye
Ku mintida afkii hooyo waa lagama maarmaane.

========

......../30-

Waxaa tiriyey Xaji Adan Axmed
(Afqallooc) Oktoobar 29keedii 72
Waxaa ka qoray Idaajaa.

## WAANO

Ninna kuma aflaxo hadal dad kale u akhriyaayaane
Afkayeenka kuu sheegayaa waa adoo kale e
In yar buu fahmaye maahan kii aabbihii yiriye
Aayaha dhulkaaga iyo dantaa lagu allaawaaye
Kuwii uurka kula jiifsadaad arag collowdaane
Haddaan dhaqanka laysaga ekaan laysma aamino e
Waa kala ajnabi laba kastoo ehel wadaagaaye
Mid waliba afkaar gooniyuu ku isticmaalaaye
Afar qofoo walaalaa haddii ruuxba beled aado
Mid waliba akhlaaq gooniyuu kala yimaadaaye
Arrinna kuma heshiiyaane way kala irdhoobaane
Mid waliba adaa toosan bay ula ekaataaye
Sidaasey barkood ku egyihiin inamadeenniiye
Waa waxay isu afdhaafayaan odayadoodiiye
Qaarbaa ankiray qoysaskey ka isirraayeene
Barashada hiddadu ku ambataa waa indho la la'aan
Asalka iyo caadooyikii idinka oo haysta
Aqoontana badsada waa tacliin waxaad u aydaane
Labadaba afkii hooyadaad aad u garanayso
Oo aad ku aftaxdaan baa iskuul eegga loo furaye
Edebta iyo dhaqankii lumay baad ururinaysaane
Ishtihaadka taariikh horlaad u ambaqaaddeene.

Waxaa tiriyey Xaji Adan Axmed
(Afqalloc) isaga oo ka wakiil
ah guddiga afka Somaliga.
Waxaa ka qoray Idaajaa Bishii
Oktobar 25 Keedii 1972.

TAHNIYADDII GUDDIGA GOLAHA SARE

Qaraarkii aydin gaadheen afkii qorid inuu yeesho
Qosol iyo faraxaan buu la dhacay qarankii Somale
Qof waliba halkuu joogay buu qaaday heellada e
Sidii ari xareed quban arkay bay ugu qamaameene
Mid kastaa intuu qalin gtay buu qaatay xaashida e
Dugsiyada qalaad iyo madbacad lagu qaraabeysto
Iyo nimankii daawada qaldaa nooga qabateene
Waxna eliba qaaliya inaan lacag la qaadeyne
Qorrax noolba libin loo bogaad wax u qalqaashaane
Markii mahadda laydiin qaddimay waad u qalanteene
Guddigii qaroomaha codkiyo hadalka loo qaybshay
Oo idin qaddarinaysa baa qawlka soo diraye
Qalibiga iyo laabtay tahniyad uga qiraayaane
Qudhayada iyo shicibkiiba waad qiiro geliseene
Rabbii haydin qaalibo dalkii baad qurux u yeesheene.

========

Raadyaha laga sii daayey
Waxaa tiriyey Xaaji Adan (Afqalloc)
Wuxuu tiriyey, 19.6.1972.
Waxa ka soo qoray Cumar Au Nux

FAALLADA SOOMAALIDA

1. Gobannimo hidday noo tahaye haatan maan barane
2. Afriikaan qarbi hor joogsadaan ugu horraynaaye
3. Halyeygii Guray baa naga dhashee haybadda lahaaye
4. Wuxuu boortaqiis kaga lib helay haradii koongoode
5. Intuu heled hantiyey buugaggaa laga helaayaaye
6. Sayidkii himmad intuu la kacay huri dagaal weyne
7. Fardihii u heensey jahaad loo haloosiyaye
8. Isagoon hubkana loo samayn lacagna aan haysan
9. Soddon sano kufaar la halgan oo ku hawo geeraarye
10. Hadhuudhkaa ka badan foosyadii haadda loo wadhaye
11. Nin walaalkii boqontii hayaa heeggii socon waaye
12. Innagaa hallaynaye qarbiga haniyihii gooye
13. Kolkii uu ka haayiray bari oo hilinka dheer aaday
14. Halkuu rabo gumeystuhu ku sheeg hadalladiisiiye
15. Isagaa horseedaye xornimo sooma hoyateene
16. Nin kastoo hagaag wadaa abaalkiisa wuu heliye
17. Maantana hiyiga geeska waa loo han weynayahaye
18. Rag horuu mar jecel baw kacayoo lagu halleeyaaye
19. Hoggaansbuu rabaye shicibkayagu waa horuu socode
20. Wixii naga habsaamiyo dantiibaa haatan loo kacaye
21. Ka hakade gumeystuhu waxay ku hammiyaayeene
22. Kolkay tawraddeennu hirgashey naga huleeleene
23. Hantidii na deeqdoo dhulkii maanta waa hodane
24. Hoggii amaahda lagu sheegayiyo hadalkii beenowye
25. Annagaa baa hibo siinna qaar noo halaahalaye
26. Halkii la arko shirarkaan tagnaan hoodo leennahaye
27. Rag halleeyey amrkuu lahaa ceebi waw halise
28. Nimankii hadhayn jiray kursiga nama hor joogaane
29. Halkii nabadi joogtaan khalqiga ugu horraynaaye
30. Hadduu damac u yahay daladaha hodanka yeeshaaye
31. Waxay u hirdamaayaan dhulaan gaadhin heer sare e
32. Hannaankaa u kala goonniyee midiba waa haabe
33. Nin masaalix kugu haysta iyo halbe mooyaane
34. Ninna inuu aduun kala hayaa waa hal soo gudhaye
35. Ninbase mid u habboon baa jirtuu ku hiyi raacaaye
36. Dar baase ku holliyoo waxaan ku qaban kuu hadoodila e

....../33-

37. Haddii aanad hus odhan qiimadday hoos u ridayaane
38. Wuu daba higsanayee jarmali hiirto ma lahayne
39. Waa waxa Amreekaba hawiray cadha hinaaskiiye
40. Weli way hibtaan faalladay ku hindisoodeene
41. Nin kaloo handadayow ma jiro waxaad helaysaaye
42. Dadkayagu hubaal wax ah fahmada waa ugu haystaane
43. Hilaadday gartaan roobka da'a hiij intuu yahaye
44. Habaaska iyo qiiqaan naqaan kii ku hoos jira e
45. Nin habeen far keli taagay baan hees ku werinaaye
46. Horuu-arag tukaan leenahay iyo daymo haad-adage
47. Ninna nalama helo tuuryo uu soo hummaajiyaye
48. Hamhamtaan ka garanhaaa dibnaha hadal la'aaneede
49. Nin kastoo humbaallaynayaan hooy waryaa nadhiye
50. Himhimawgu waxa uu ku jiro wayska hubinaaye
51. Nin keliya oo na hoosaasiyaan hooyadiis dhaline
52. Ma halmaami karo xaalkayaga hayb nin noo lihiye
53. Hunnufaa dhurwaa iyo dawaca daba hadaaqaaya
54. Midna inuu dagnaan naga helaa waa ka habartiise
55. Ma hanyarine waxaan tiigsannaa heegada sare e
56. Halka dhexe xiyaad ihaannu nahay waa hurti la'aane
57. Sadiiqse nala heshiis ahiyo cadow boqonta heeraaya
58. Mid waliba halka u waajibuu naga helaayaaye
59. Gobannimo nihkii haybiyaan hoo gacmaa nadhiye
60. Hindiya iyo Bagastaan markii uu joogey hadalkoodu
61. Ma hamrane codkii baannu nidhi nagu habboonaaye
62. Hawlihii Roodhiishiya markii la isku haaraamay
63. Hindisahayagii baa qabuul helay gadaalkiiye
64. Halhaleel u yidhi 'FIITO' dii hiid intuu baqaye
65. Waa hadafkayaga tacaddii inaanu is hor taagnaaye
66. Inay guul helaan Carabtu waa u hambalyoonaaye
67. Xidhiidh noo horreeyaa jiriyo hayb Islaamnimo e
68. Hadnaba aamin ma leh oo qarbigu waana la hubaaye
69. Nin ku diley hadh kuma geeyo oo hore ba loo sheegye
70. Kuwaannu hawl wadaag wada nahay oo Ruushanku hoggaansho
71. Horuu marinta iyo hil ba wayskaga hallaynnaa
72. Umana hadnane shaqadayada waan hirgelinaaye
73. Iyaga ba hantidu waa yartahay waxay ka haystaane
74. Kuuriya waxay hidin karaan la hakan maayaane

..../34-

75. Hagar li'i kokii laga arkiyo daacadda hagaagsan
76. Hannoolaadu shiinuu dadkii haataan leeyahaye
77. Ka kufnaade dawlado kalaan uga han weyneyne
78. Afriiqiya halkay tahay baa waa hilib wadaagtaaye
79. Waysugu hilawdaa dantiyo heerka guudnimo e
80. Ha yeeshee dhibaha hoose iyo hawsha gudahooda
81. Weli kama hammiyayaan inay kala hagaajaane
82. Hanti aanu lahayn maal ninkii waayo badan haystey
83. Hagar li'i inuu dhiibi karo waanu hidinaynne
84. Kan lihina sidaa kuma hadhoo heeggan baa dhaca e
85. Walaalaha heshiisaa cadowgood hor joogsadà e
86. Rag iyaguba haad eegata ah oo dhac kala haysta
87. Inay baadi wada haybiyaan waa halaan dhicine
88. Nimba wuxuu hayuu kii lahaa hoo yidhaa wacane
89. Haddii kale is raacu waa ku halis godob hareer taalle
90. In kastaan siyaasado hambaga ka hiyi faallooday
91. Oo aan qolaba dawgay hayaan hore u dod sheegay
92. Hawraartu uma jeeddo axad loo halaahalaye
93. Habka umamka iyo xaal adduun waa hurdo ogoowe
94. Wax ba yaan helblayn dawladaha hayb kastaa noqo e
95. Waa hogatus waxa aan idhi iyo heeriguudnimo e
96. Wax ii hadhay hal igu waajiba oo teenna ku habboone
97. Layskuma hallayn karo waxaan muruqu soo hoynne
98. Hadduu aadanuu wuxuu hayoo hibo ah kuu dhiibo
99. Ninkii gacan la hoogaansho sugey gaajo waw halise
100. Hurdo iyo macaawino ajnebi hore ba loo eedye
101. Himmad iyo dedaal wada jiraan hodan ku gaadhnaaye
102. Ninna kuma harraad baxo biyaha hoo la leeyahaye
103. Waxaad ka harqataa labada sacab waxay haleelaane
104. In kastaan tallabo hor leh iyo kaalmo badan haynno
105. Weli waa horraysaa rugtii loo horssed tegaye
106. Hoobaantii wax inooga hadhay hawlaan qabannaaye
107. Kolkii uu raggii hore hayuu habacsanaa xaalku
108. Kuwaa handanayseen hadday idin hoggaansheene
109. Ku hanuuna waa taa xornimo haanta loo culaye.

=========

...../35-

Waxaa tiriyey: Xaaji Adan
(Afqalloc) Wuxuu tiriyey
1970

CALANYAHAW WANAAGSANI

Calanyahaw wanaagsani kugu caana maalaye
Carradoo mugdiyo baad caddaysayoo iftimisaye
Waxa kuu claamada xiddigtaada caanahe
Caleentaa farxaan kugu ah cagaarka iyo ubaxa e
Shimbiraha ciyaayaana caashaqaaga weeye e
Caddo shaniyo tobanaad caalaamkii ku noqoto
Kolkii aan cidhiidh geliney cadaawii gumeystaha
Dhulkaagaa casiiska ah aduu kaaga cararee
Haddaad waayo cabatayna cahdiyadii danaystaha
Tawrad caafimaad baa kolkaad ciirtay dhalatay e
Waa tii laguu cigay camal wixii habsaamoo
Kuwa maanta kuu ciidmay curaddadaadii weeye
Ciirada iyo boodhkiyo ciddiyihii safiirrada
Caawa waa habeenkii lagaa maydhay ceebta e
Kolkaad caadda sare gaadhay cawadaada weeyee
Caadada iyo dhaqankii cusayb baad u ciilisee
Cilladii xumaa iyo xeerkii baa carraabaye
Cadaalad ishtiraakiyo amnaa lagu eaweeyee
Colaaddiyo dilkii baad cidhibtooda goysoo
Caawimo is-kaashiyo caqlaad nagu abuurtee
Ciidankaaga xooggaa cajab iyo la yaab lehe
Cadow aad ka baqataana carro edeg ma joobo e
Culuqyaase kaa maqan cida dhow ku laaban e
Iyana inaannu soo celino cahdaan kuugu qaadnaye
Ha ceeshtee bisha Oktoobar waa caqiibadaada e
Cimrigaa ha dheeraado calanyahaw wanaagsani.

========

..../36-

Waxaa tiriyey Xaji Adan Axmed
(Afqallooc ) 1970

WAA DUNI

I. Tabaalaha khalqiga iyo amniga samada loo tuuray
2. Raxmadda oo qalibiga laga tiroo dhiggii lagu taamay
3. Daciif nabad ku taawoonayoo tebaya oo waayey
4. Iyo turugyo-weynaha dulmayoo garab ku taagleeyey
5. Taan kaga fakaray faalladii tawsta igu reebtay
6. Tartarrada iyo feedhaha i jabay taqallubkii jiifka
7. Taahaan ku raagay iyo codkaan talalayoo reemay
8. Tiiraanyadaan soo kacayoo tahan ka qiirooday
9. Tu yaroon ka idhi baa jirtoo waan tawaawacaye
IO. Balaan tiriyo faalaada adduun galaba waa tooye
II. Waa duni tabiyo xeeladiyo tacaddi joogaaye
I2. Waa duni sharcigu taaganyahay taag anaa badane
I3. Waa duni ninkii tamar darraa lagu tunsiiyaaye
I4. Waa duni Abbool tacajubliyo luuno taliyeene
I5. Waa duni rag temeshleynayaa tegey nujuumtiiye
I6. Waa duni qumbulad tuuristeed loo tartamayaaye
I7. Waa duni aqmaar togan hawada lagu tegaayaaye
I8. Waa duni dayaxa tan ugu dheer ruux tallaabsadaye
I9. Waa duni tiraabkii cirkiyo tanu is gaadheene
20. Waa duni dayuurado tanliyo taar xukumayaane
2I. Waa duni quwadi taabtay iyo toobigaannaduye
22. Waa duni tan keliyey maqlaan tahay madaafiice
23. Waa duni dadnimo tuurtayiyo toobadiyo diine
24. Waa duni furqaan laga tegiyo tuu injiil yidhiye
25. Waa duni tilmaamay xaqii taamusoo lumaye
26. Marna kuma tallamin caalam kale inay tegaayaane
27. Tunjilleecse umam loo diley buu taahu baxayaaye
28. Tiirri iyo naxariis darraa loogu taagsadaye
29. Ka tagaa la yidhi qaar dhulkey tir u lahaayeene
30. Tabtii bahalihii bay cuneen taagyarowihiiye
3I. Tobanaan malaayiin ahoo cudur la tiicaaya
32. Iyo qaar tacliintiyo cuntada taabi kari waayey
33. Taakulo la siiyaa ka roon toogashiyo xooge
34. Tagoogey ka soo wada baxeen waxay takooraane
35. Dubkaa kala Taggane haybta waysugu tegaayaane

36. Cilmigu maaha kaa tamar badniyoo tiir biraan ahaye
37. Nin walba tiisu waa dhimantahay oo tooggo beel malehe
38. Tabantaabo lay caawinaa waa tu waajibahe
39. Dhibtuna waxay ka tami uumiyaha tirada weyna gaadhay
40. Tiseiin gaajo laysaa jirey toban dhergaayaane
41. Kuwaasoo wuxuun lagu taray tahay aqoontiiye
42. Mar haddii cadliga laga tagoo lays taxgelin waayo
43. Inay nabadii taam noqoto waa tu aan la eegeyne
44. Sawaariikh nin taabiyo ninkii toorri bira haysta
45. Ninba tuu awood ba dil waysugu tegaayaane
46. Naftuna waa tu qudha oo ma jiro toban nin haystaaye
47. Marka uu faqiir tago ma jiro taajir hadhayaaye
48. Tusbax weeye gees laga furayoo tuug is wada raacye
49. Gantaalaha tamuumiyo suntaa tuurista u dhow e
50. Haydro-igiinkaa ku tuman tacabkii iinsaane
51. Taariikhda weyn iyo cilmigaa taa ku baabbi'iye
52. Marka ay xadaaradi tagtoo taangi ku cayaaro
53. Oo boqolka tobankii hadhaa tuna awood waayo
54. Tiih iyo mugdi baa lagu dambayn tii la soo maraye
55. Sharkii baa taabbagalay khayrna waa taa la kaarahaye
56. Xil ma taabin nimankii wakhtigan taabka buuxsaday
57. Ummaddii timaaddaa ba waa tay naeladaysaae
58. Allahow yaa dhib waxa loo taboaday samo ku taageera.

---

Xaaji Adan Axmed Afqalloc 1970

## UBAXII DALKEENNOW

Doogada xayaadikiyo ubaxii dalkeennow
Rabbi haydin daayee tacliinta u dedaala
Dadku waa isku abuure jahlaa dilay intiisa e
Ubaxii dalkeennow tacliinta u dedaala
Cilmigu waa daruuriyo hogol idiin da'aysa e
Cilmigu waa dawada ruuxa indhaha u dillaacsha e
Cilmigu waa dariiq nuura halkaad adigu doonto e
Cilmigu waa kan diinteennu dalba tidhoo ammaantaye
Cilmigu waa kan dawladaha dayaxa u horseedaye
Cilmigu waa kan daabbadaha dusha mara sameeyoye
Cilmigu waa kan dulimaadka batrool lagaga doonaye
Cilmigu waa kan daaddihiya doonayaha Aboollo e
Cilmigu waa kan lagu duulay laguna soo degaayo e
Ubaxii dalkeennow tacliinta u dedaala
Kuwo idinla da' ah baa dayuurado sameeya e
Adinkuna ku daydoo tacllinta u dadaala
Deriskii habsaamiyo saacaddii dayacantana
Dibbbaan loo arkaynin tacliinta u dedaala
Dadkiinna adiin aayi weli adhiga daaqiyo
Dooh leh awrka guura e tacliinta u dadaala
Macdanteenna weli dedan jahli baa daboolaye
Dahabka aydin qodateene tacliinta u dedaala
Gobollada dib dhacay baa idin soo deyaaya e
Aad xooriyad u doonteene tacliinta u dedaale;
Dulmigii horeetiyo dib dhicii ma joogo e
Daawada bilaadkoo tacliinta u dadaala
Yididdiilo dihiniyo dabayl caafimaad baa
Dalkeennii ka muuqda e tacliinta u dedaala
Dawlad ishtiraakiyo madax daacad u ah baa
Rabbi innooku deeqaye tacliinta u dedaala
Duco iyo salaan aan golaha weyn u dirayaan
Hadalkii ku daayaye tacliinta u dedaala.

=========

Waxa tiriyey Xaji Adan Axmed
(Afqallooc)
Wuxuu tiriyey Abril 24, 1973.

Waxa ka qoray: J/le Cumar Au Nux

J I I F T O

Haddaynu qaddiyo nahay qarammada Afrikow,
Ninna aradcuun kale inuu qaato maahee
Waa qalad kii yadhi Ferenji baa wax qaybshaye
Haddaynaax wada qaban qabyo beeli mayno e
Gumeystahilaafkeennu waa qaayihiisee
Isagaa isqoryeeya labadii isqabatee
Halka dhga lagu qubo iyaga waw qaniimade
Kolkay qxdo baaruuddu iyagaa qoslaayee
Qaddigiyjeeddaduna ninna kama qarsoona e
"O.A.U" kay qabatay qiima yeelan maayee
Intaynu ku qaybnaa shisheeyuhu badh qaadane
Qoortaa waa nabadda intaan qawdu yeedhine
Marka madfaeu qiiqo waa nin iyo qoodhiiye
Ragna duu ku quudhoo qaad iyo dhac kaa wado
Ma qadcisid adiguna e qab baa laysla jiidhiye
Uma qanto xaajadu qushi iyo fudaydsiye
Waa hawle qoonliyo naf qarraarka joogtee
Waxaamaanta laga qaban berri kuma qumaysee
Rag ulkiisii laga qaaday qulub yeeli maayee
Hadd aan gar loo qaadin xaqiisiina loo qirin
Qas wax ah dalkiisii quwad inuu ku doonto e
Qoqbaduu cadow dhigay miinaday ku qariyeen
Hadan meesha laga qaadin qaraxaa xigaayee
Kol nabadda lagu qooqo qusuur lama hurdaayee
Soli waa qoys qudh keliyoo walaal ahe
Qoollo laysku tolay iyo maaha dhawr qabiilo e
Qasaay markay maqasho qofna baaqan maayee
Qan waxaan ku leennahay qalalaaska dirirtee
Qafaha iyo baadiyaha qaawa-nahaa xukumayee
Qooyinkaannu deris nahay qaabaddaa ma moogee
W badan baannu qiil doonnay amni lagu qaboobee
Ariiqiya qadhaadhiyo qahar la dooni maynee
Qih keliyoo ka dhimataa waa nagu qasaaree
Clabka waxaan u sidannaa quruumaa gumeystee
Ixiise aan na qabaniyo qallooc yeeli maynee
a qoomamiyo ciil talo haddaan la qaadane

Xaqaa qaalib ahe kibirka qori laguma jebiyee
Arrimahaan qorroo idil dhego qaata waayee
Wixii qaadir fulinaayo qoon kale ma baajee
Marka qalad hadduu dhaco annagu qoonsi ma lihine
Quruumaa Afriikiyo qaadada u talisaay
Adinkuna warkaa qaba qarin mayno xaalkee.

======